

Suurat Al-Calaq

سُورَةُ الْعَلَقِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Wax ku akhri Nabiyoow Magaca Eebe ee abuuray (khalqiga).

2. Dadkana ka abuuray Calaaq*.

3. Akhri Eebena waa kan Sharafta lehe.

4. Ee Dadka baray sida Qalinka wax loogu qoro.

5. Dadkana baray waxayna aqoonin.

6. Saas ma aha ee Dadku (Gaaladu) waa gudbeen.

7. Markuu isku ogaaday Hodontinimo.

8. Eebahaa xaggiisaase loo noqon.

9. Ka warrama midka ka reebaya.

10. Addoon (Eebe) oo tukan Saaladda.

11. Bal ka warrama hadduu ka laga reebi hanuunsanyahay (waa Nabiga).

12. Ama uu fari Eeba ka yaabid.

13. Balse ka warrama hadduu midka wax ka reebi uu beeniyay (xaqa) kana jeedsaday (waa AbuuJahal iyo wixii la mid ahe).

14. Miyuusan ogayn in Eebe arko.

15. Saas ma aha ee hadduusan joogin waxaannu qaban Foodda.

16. Food beenaleey ah gafna badan.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

أَفْرَأَيْتَ الَّذِي حَقَّقَ ﴿١﴾

حَقَّقَ الْإِنْسَانَ مِنْ عَلَقٍ ﴿٢﴾

أَفْرَأَيْتَ أَكْرَمُ ﴿٣﴾

الَّذِي عَلَّمَ بِالْقَلَمِ ﴿٤﴾

عَلَّمَ الْإِنْسَانَ مَا لَمْ يَعْلَمْ ﴿٥﴾

كَلَّا إِنَّ الْإِنْسَانَ لَطَفِيءٌ ﴿٦﴾

أَنْ رَأَاهُ اسْتَفْتَى ﴿٧﴾

إِنَّا لِلرَّبِّكَ الرَّجُوعُ ﴿٨﴾

أَرَأَيْتَ الَّذِي يَنْهَى ﴿٩﴾

عَبْدًا إِذَا صَلَّى ﴿١٠﴾

أَرَأَيْتَ إِنْ كَانَ عَلَى الْهُدَى ﴿١١﴾

أَوْ أَمَرَ بِالْقَوَى ﴿١٢﴾

أَرَأَيْتَ إِنْ كَذَّبَ وَتَوَلَّى ﴿١٣﴾

أَلَمْ يَعْلَمْ بِأَنَّ اللَّهَ يَرَى ﴿١٤﴾

كَلَّا لَئِنْ لَرَبَّنَا لَسَمِعًا بِالنَّاصِيَةِ ﴿١٥﴾

نَاصِيَةٍ كَذِبٍ خَاطِئَةٍ ﴿١٦﴾

17. Ha u yeedho gargaarihiisa.

فَلْيَدْعُ نَادِيَهُ ﴿١٧﴾

18. Waxaannu u yeedhi Malaa'ig darane.

سَنَدْعُ الزَّبَانِيَةَ ﴿١٨﴾

19. Saas ma aha ee warkiisa ha maqlin Sujuudna una dhawow (Eebe).

كَلَّا لَا تَطَّعَهُ وَأَسْجُدْ وَقُتِرْ ﴿١٩﴾

Suuraddani waa Suuraddii Quraanka u soo hor dagtay, waxayna ka billaabatay faridda wax barashada iyo Qalinka, taasoo ku tusin sida Diinta Islaamku ugu horrayso wax barashada iyo la dagaallanka Jahliga, waxaa kalooy ku tusin xumaanta isla waynida iyo Dadka oo xaqa laga reebo, iyo inaan la maqlin xumaanle warkiis ee Eebe lagu xidhnaado illeen isagaa xoog iyo awoodba leh.

Abuu-Hurayra waxa laga wariyay in Rasuulkii Eebe «Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee» yidhi: «Addoonku wuxuu Eebihis ugu dhawyahay markuu sujuudsanyahay ee badiya Ducada. Waxaa wariyay Muslim. Al-Calaq (1-19).

* Wax yar oo ku dhaga darbiga riximka (dib u eegaha).



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista:

1. Annagaa soo dajinnay Quraanka Habeenka LaylatulQadarka ah (sharaf-ta leh).

إِنَّا أَنْزَلْنَاهُ فِي لَيْلَةِ الْقَدْرِ ﴿١﴾

2. Ma taqaanna LaylatulQadarka.

وَمَا أَدْرَاكَ مَا لَيْلَةُ الْقَدْرِ ﴿٢﴾

3. Waa Habeen ka khayr badan Kun Bilood (oo kale).

لَيْلَةُ الْقَدْرِ خَيْرٌ مِنْ أَلْفِ شَهْرٍ ﴿٣﴾

4. Waxaana soo daga Malaa'igta (kale) iyo Malaku Jibriil habeenkaas idanka Eebe dartiis iyo amarkiisa.

نَزَّلَ الْمَلَكُ وَالرُّوحُ فِيهَا بِإِذْنِ رَبِّهِمْ

مِنْ كُلِّ أَمْرٍ ﴿٤﴾

5. Waana Habeen nabadgalyo inta waagu ka baryil.

سَلَّمَ هِيَ حَتَّى مَطْلَعِ الْفَجْرِ ﴿٥﴾

Wuxuu Eebe innoogu sheegay Suuraddan inuu Quraanka sharafta leh soo dajiyay Habeenkaa wanaagsan ee ka khayr badan kun bilood, waxaana la sheegay in Habeenkaasi ku jiro Bisha barakaysan ee Soon.

Saas daraadded mar hadduu yahay Habeen Sharaf leh Malaa'igtuna soo daga Habeen nabadgalyana yahay, waa in lagu dadaalaa sidii loo helilahaa wanaaggana la badiyo xumaantana la yareeyo.

Abuhurayra waxaa laga wariyay in Rasuulkii Eebe «Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee» inuu yidhi: «Ruuxii Istaaga Laylatu-Qadarka «Salaad» Rumayn iyo ajri doonid darteed waa loo Dhaafaa wixii hormary oo dambiisaa ah» Waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim. Al-Qadr (1-5).